

Macluumaad la xiriira turjubaanka oo loogu talaggalay dadka waddanka u soo guuray

- Haddii aanay jirin luqad ka dhexeysa, sida sharcigu dhigaayo ee ku salaysan hirgelinta sinnaanta iyo caddaaladda dhanka luqadeed iyo xuquuqda ammaanka, waxaa hawlwadeennada dowladda ku waajib ah in ay goobta keenaan turjubaan. Shirkadaha turjubaannada ayaa qabanqaabinaaya dhammaanba arrimaha la xiriira turjumista, waxaana ay xil iska saaraayaan arrinka ku saabsan, in turjubaanka u imaanaaya inuu turjumo uu yahay mid rasmi ah oo xirfad u leh hawsha turjumista.
- **Waqtiga turjumista hore ayaa la isula meeldhigaa oo loo qabtaa. Turjumista degdegga ahna waxaa la diyaariyaa, markii ay jirto xaalad degdeg ah oo kaliya.**
- Turjubaanku markasta ma imaanaayo goobta turjumista. Waxaa markii loo baahdo turjumista loo qabanqaabin karaa qaabka turjumista telefoonka. Waxaa dhici karta mararka qaarkood in turjubaanku uu adiga ku soo waco, si uu kuugu soo gudbiyo farriin gaaban oo uu kaaga wado hawlwadeennada dowladda.
- Turjubaanka si toos ah uma wici kartid. Haddii aad arrin ama dan leedahay, waxaa ugu horreeya oo aad la xiriirtaa hawlwadeenka dowladda. Hawlwadeenka dowladda ayaa adiga kuu dalbaaya turjubaanka.
- Xirfadda turjubaanka waa mid looga baahan yahay, in turjubaanku uusan wax xiriir soke ah la lahayn macmiilka uu u turjumaayo. Waa sababtaas midda keentay in turjubaanku uu u dhaqmaayo qaab ah inuu iska kaa fogeynaayo, islamarkaana uusan doonaynin inuu wax caawimaad ah kaa siiyo waxyaabaha ka baxsan xaaladda turjumista.
- Sida badan shaqada turjumista waa mid aad u weyn, taasoo keenaysa in turjubaanka uu sida gaarka ah qofku u rajaynaayay inuu u turjumo aanay suuraggal ahayn in mar walba la helo. Waxaa dhici karta in arrinkaagu uu si iska macnodarro ah dib ugu dhaco, haddii aad dalbashada turjubaanka ku xirto shuruudo aad u adag. Waa inaad aamintaa in turjubaanka kaleba uu hawsha turjumista uga soo bixi karo si fiican oo la mid ah sida turjubaankii aad rajaynaysay. Si kastaba waad codsan kartaa turjubaan nin ama haween ah, haddii mowduuca laga hadlaayo uu yahay mowduuc xasaasi ah oo aan la soo shaacbixin karin.
- Waxaa dhici karta in turjubaanku uu noqdo mid kaa jinsiyad ama isirwadaag duwan, oo cid kale ama koox kale ka soo jeeda, amaba kaa diin duwan. Dhammaantoodba waa dad leh xirfadda turjubaanimada. Waa inaad ku kalsoonaataa turjubaannada.
- Turjubaannada wax saamayn ah oo ku saabsan aragtidooda kuma yeelan karaan arrimaha qofka macmiilka ah ee ay u turjumayaan. Shaqada turjubaannada waxaa weeye oo kaliya in ay turjumaan arrimaha laga hadlaayo. Turjubaanku hadalka kuma kordhin karo waxaan arrinka khuseynin, sidoo kalena hadalka waxba kama reebi karo. Waxaa uu goobta u joogaa inuu qabto hawsha turjumista ah ee laga doonaayo.
- Xittaa haddii qofka macmiilka ah uu u arko inuusan turjubaan u baahnyan, hawlwadeenka dowladda waxaa uu xaq u leeyahay inuu turjubaan dalbo.
- Waqti hore soo sheeg, haddii aadan imaanaynin kulanka laguu turjumaayo.

Turjubaanadu ma lahan wax kaalin gaar ah oo ay kaga jiraan bulshada Finland dhexdeeda, Kaliya waa shaqaale caadi ah iyo xirfadlayaal dhanka luqadda ah, kuwaasoo ka caawinaaya dadka waddanka u soo guurey, sidii ay xiriir ula sameyn lahaayeen hawlwadeennada dowladda.

Turjubaanku wax go'aan ah kama gaari karo arrimha laga hadlaayo, sidoo kale wax saameyn ah kuma yeelan karo sida ay howluhu u socdaan.

XAALADDA TURJUMISTA

Turjubaanka waxaa saaran mas'uuliyadda ah xifdinta xogta arrinka meesha looga hadlaayo – qofna uma uu sheegaayo arrimahaaga.

Turjubaanku wuxuu wax u turjumayaa qaabka ah-aniga (markuu hadlaayo wuxuu isticmaalayaa siiqada ah aniga).

Turjubaanku wuxuu turjumayaa dhammaan wixii aad ku hadasho, sidaas darteed ha ku hadlin wax aadan rabin in ay maqlaan hawlwadeennada dowladda.

Markaad hadlayso waxaad fiirisaa hawlwadeenka dowladda, ee ha firiin turjubaanka.

Ha la hadlin turjubaanka inta ay hawsha turjumistu socoto, amaba ha weydiinin wax ku saabsan fikirkiisa.

Markaad hadlayso ha isticmaalin maahmaahyo, hadalo kaftan ama af suuqeed ah, waayo waxaa dhici karta in ku turjumistooda luqadda finishka ay tahay mid aad u adag / amaba aan suuraggal ahayn.

Si wanaagsan hadalkaaga u kala qaybi, oo wax xoogaa nasasho ah geli, si turjubaanku uu u haleelo in si sax ah ugu turjumo dhammaan wixii aad sheegtay.

Waxaa dhici karta in turjubaanku uu ka diyaarsado turjumista wax xoogaa xusuusqor ah oo fudud, kaasoo uu tirtiri doono ama baabi'in doono turjumista kaddib.

Waxaa dhici karta in turjubaanku uu adiga kaa codsado turjumista dhexdeeda inaad hadalka joojiso, ama aad ku soo celiso, si tartiib ah u hadasho ama aad caddayso, wixii aad hadda sheegtay.

Waxaa kaloo dhici karta in turjubaanku uu marar badan hadalka kaa hubsado- mar labaad uu ku weydiyo- si uu u hubsado in uu si sax ah kuu fahmay. Haddaba waxaad ogaataa marka turjubaanku uu badanaa wax ku weydiinaayo, in taasi aanay macanaheeda ahayn in uusan fahmin hadalkaaga.

Noqo qof firfircoon, weydii wixii aadan fahmin!